# AKHBAARTA LA YIRAA HIPAA

Ready.Set. Smile

### OGOYSIISKA HAB DHAQANKA XOG XAFIDIDA

OGOYSIISKANI WUXUU TILMAAMAA SIDA AKHBAARTAADA CAAFIMAAD EE ADIGA KUGU SAABSAN MAADAANMA AAD BUKAAN TAHAY LOO ISTICMAALI KARO AMA LOO BIXIN KARO IYO SIDA AAD KU HELI KARTID AKHBAARTAN. FADLAN SI TAXADAR LEH DIB UGU EEG. XAFIDDA XOGTAADA CAAFIMAAD AAD BAY MUHIIM NOOGU TAHAY ANAGA.

### WAAJIBKAYAGA SHARCIYAN NA SAARAN

Sharciga dowlada dhexe iyo kan gobolka ayaa naga faraya anaga in aan dhowro xogta akhbaarta caafimaadkaaga.sharcigaasi wuxuu na farayaa oo kale anaga in aan ku siino nidaamkan ku saabsan barahayaga kulanada iyo hab dhaqankayaga xog xafidida, waajibaadkayaga sharciyan na saaran iyo xaquuqdaada akhbaartaada caafiamad Waxaa nalaga rabaa in raacno hab dhaqanka xog xaifida ee aan ku tilmaamnay ogoysiiskan inta uu jiro. Ogoyssikani waxaa uu bilowday ***1/28/14*** waana uu jiri doonaa inta laga bedelayo

Waxaan xaq u leenahay in aan wax ka bedelno hab dhaqankayaga xog xafidida iyo qodobada heshiiskani uu dhigayo markii aan rabno, hadii sharciga uu saa qabo. Waxaan sidoo kale xaq u leenahay in aan wax ka bedeli karno hab dhaqankayaga xog xafidada iyo waxa uu kakooban yahay ogoysiiskayagani wuxuu saameynayaa dhamaan wixii akhbaar ah ee aan aruurino akhbaartaas oo ay ku jiraan akhbaarta caafimaadka ee aan aruurinay ama aan helnay ka hor isbedelka. Ka hor inta aan is bedel weyn lagu sameyn hab dhaqanka xafidida xogta, waxaan marka hore bedeli doonaa ogoysiiskan oo waxaan ku bedeli doonaa ogoysiis cusub oo aad heli katrid hadii aad u baahato.

Waad codsan kartaa in asagoo nuqul xaashi ah lagu siiyo ogoysiiskan marka aad rabtid. Wixii akhbaar ah eeku saabsan hab dhaqankayaga ama nuqulo dheeraad ah ee ogoysiiskan fadlan nala soo xiriir adigoo isticmaalaya akhbaarta ku qoran ogoysiiskan.

### ISTICMAALKA IYO BIXINTAYADA EE AKHBAARTA CAAFIMAADKAAGA

Waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalno ama aan u bixino akhbaartaada caafimaad ee adiga kugu saaban daaweyn, kharash bixin iyo hawl galo kale oo caafimaad.Tusaale ahaan:

**Daaweynta:** Waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalno akhbaartaada caafimaad daaweynta, kharash bixinta ama in la siiyo dhaqtar ilkood ama dhaqaatiir kale oo adiga ku daaweynaysa

**Bixinta Kharashka:** Waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalno ama aan u bixino akhbaartaada caafimaad si loo bixiyo adeegyada aan ku siino. Waxaa kaloo laga yaabaa in aan siino akhbaartaada caafimaad daryeel caafimaad bixiye kale ama Waxaa laga yaabaa in akhbaartaada caafimaad aan siino urur kale oo caafimaad oo iyana uu qabto xeerarka dowlada dhexe ee xog xafida

**Hawgalada Daryeelka Caafimaad:** Waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalno ama aan u bixino akhbaartaada caafimaad arimo la xiriira hawgaladayada daryeelka cafimaadka ah. Hawlgalada daryeelka caafimaadka waxaa ka mid ah daryeelka caafimaad ee tayada leh, iyo sii wanaajinta hawlaha la qabto, iyo in ay mujaaraco ku sameeyaan karitaanka ama shahaadooyinka xirfadleyaasha bixiya daryeelada qiimeynta wax qabadka xanaane bixiyeyaasha, qabanqaabada mashruucyo tababar, shahaado siin,, shati siin iyo hawlaha kale ee sharciyeynta ah. Waxaa laga yaabaa in akhbaartaada caafimaad aan siino urur kale oo caafimaad oo isna uu qabto xeerarka dowlada dhexe ee xog xafida xiriirna adiga kula leh si loo gargaaro qaar ka mid ah hawlagaladooda daryaalka caafimaadka ku saabsan.

Waxaa laga yaabaa in aan bixino akhbaartaada si aan uga caawino ururadaas in ay sameeyaan daryeel caafimaad oo tayo leh, ina sii wanaajiyaan hawlaha ay qabtaan iyo in ay mujaaraco ku sameeyaan karitaanka ama shahaadooyinka xirfadleyaasha bixiya daryeelka caafimaad ama ay ogaadaan ama uga hor tagaan musuqmaasuqa iyo tacadiga

**Ogolaanshahaaga:** Waxaa laga yaabaa in aad na siiso ogolaansho qoran si aan ugu istcimaalno akhbaartaada caafimaad ama aan u siino cid kasta oo aad noo ogolaatid in aan siino, Waad ka noqon kartaa ogolaanshaas markii aad doontid Ka noqodkaasi ma saaameynayo wixii isticmaal ama bixin ahaa ee dhacay intii ogolaanshihii hore uu jirey. Ma isticmaali karno mana bixin karno akhbaartaada caafimaad.inaba marka laga reebo sida uu dhigayo ogoysiiskani.

**Qoyskaaga iyo Saaxiibadaa:** Waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalo ama siino akhbaartaada caafimmaad xubin qoyskaaga ka mid ah, saaxiib ama qof kale hadii laga maarmi waayo ah si aad u caawino daryeelkaaga caafimaad ama bixinta daryeelkaaga caafimaad. Ka hor inta aanaan siin akhbaartaada caafimaad dadkaas waxaanu ku siin fursad aad ku diidi kartid bixintada ama isticmaalkayaga ee akhbaartaas. Hadii aadan joogin, ama lacala aadan awoodin ama xaalad degdeg ahi ay jirto waanu bixin akhbaartaada caafimaad anagoo ku salyanayna xikmadayada xirfadeed ee ah in bixinta akhbaartaasi ay tahay mid maslaxadaada ah..Waxaan isticmaali doonaa xikmadayada xirfadeed iyo waayo aragnimadayada oo ay weheliso hab dhaqankayga guud si aan u gaaro go'aano caqli gal ah oo maslaxadaada ah iyo cidii aan u ogolaanayno in ay dawooyinka, raajooyinka, kuu soo qaado,a m a w i x i i k a l e e e l a m i d a h e e l a x i r i i r a a k h b a a r t a caafimaadka..Waxaan sii karnaa akhbaartaada qofka gacanta kugu haya

**Balamo Xasuusin:** Waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalo ama bixino akhbaartaada caafimmaad si aan adiga kuu xasuusino balamaha (sida fariimaha cajalada lagu duubo waraaqaha ama kaararka,.

**Gargaarka Masiibooyinka:** Waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalo ama siino akhbaarttaada caafimmaad hay'ado dadweyne ama kuwo gaar loo leeyahay hadii uu sharcigu noo ogol yahay si aan u gargaarno gargaar masiibooyinka dabiici ah wax looga qabanayo.

**Faa'iidada Dadweynaha:** Waxaa laga yaabaa in aan u isticmaalo ama bixino akhbaarttaada caafimmaad hadii uu sharcigu noo ogol yahay sababahan soo socda hadii loo arko in sababahaasi yihiin kuwo maslaxada ama faa'iido u ah dadweynaha:

- Sida sharcigu uu qabo;
- hawlaha caafimaadka guud, oo ay ku jiraan tabinta xanuunada iyo macluumaadka muhiimka ah soo sheegida ilmaha la fara xumeeyo,,la socodka hay'ada FDA, iyo shirkadaha loo shaqeeyo soo sheegidooda dhaawacyada iyo xanuunada shaqooyinka la xiriira
    - soo sheegida dayacida iyo faraxumeynta dadka waaweyn, ama gacanqaadka qoyska
    - hay'aha la socodka caafimaadka;
    - Ka jawaabid amar maxkamadeed ama awaamiir maamul iyo ujeedooyin kale oo sharciga waafaqsan
    - mas'uuliyiinta sharci ilaalinta oo wata warqad maxkamadeed iyo ujeedooyin kale oo sharciga waafaqsan oo ku taxa luqa dhibaneyaal dambi laga galay, dhimasho shaki ku jiro, dambiyo ka dhacay goobtayada, soo sheegida dambiyada i degdega ah, iyo ujeedooyinka cadeynta ama helida qof tuhun laga qabo ama cid kale.

- baareyaasha sababta qof u geeriyooday, ama agaasimeyaasha goobaha dadka lagu duugo;
- ururada qof dhinta xubnaha ka bixiya;
- si looga hortago khatar ku timaada caafimaadka ama amaanka
- la xiriirta cimi baaris khaas ah;
- militariga iyo mas'uuliyiinta dawlada dhexe si ay ugu adeegsadaan sir doon sharciga waafaqsan, daba galka sirdoonka, iyo hawlaha kale ee amaanka qaranka;
- xabsiyada iyo maxaabiista ;iyo
- sida uu ogol yahay sharciyada xaqsiinta shaqaalaha shaqada ku dhaawacma..

**Xaquuqda Bukaanka**

**Helid:** Waxaad xaq u leedahay inta badan in aad aragtid ama aad heshid nuqulada akhbaartaada caafimaad. Waxaad codsan kartaa in aan ku siino nuqulo aan qaab sawir aheyn. Waxaan isticmaali doonaa qaabka aad codsato hadii aan awoodno. Waa in aan codsigaaga aad soo qortaa si aad u hesho akhbaartaad caafimaad. Waad codsan kartaa helitaanka adigoo warqad noogu soo hagaajinaya ciwaanka gadaal kaga qoran ogaysiiskan. Hadii aad codsato nuqulo waxaan kaa qaadaynaa lacag yar oo khidmad ah khidmadaas waxaa ku jirta kharashka adeegyada,la qabtay, kharashka sawirida qoraalada iyo farangaboolada. Hadii aad codsatid in qaab kale akbraataas lagugu siiyo, waxaan kaa qaadi doonaa khidmada kharashka ku baxa akhbaartaada caafimaad ee qaabkaas ah ku salaysan. Hadii aad rabto,waxaan yeeli karnaa in kastoo aysan khasab aheyn in aan · kuu diyaarino – soo koobid ama sharaxaad kooban oo ku saabsan akhbaartaada caafimaad hadii aad la baxdid khidmada hawshaas. Nala soo xiriir si aad u hesho akhbaarta khidmada ku saabsan adigoo isticmaalaya akbaarta ku qoran gadaalka ogosiiskan si aad u heshid akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan khidmadaha.
**Bixinta iyo la xisaabtankan:** Waxaad xaquuq u leedahay in aad hesho liiska inta goo r ee anaga maa cid naga wakiil ahi ay cid kale u gudbisay akhbaartaada 6 dii sano ee la soo dhaafay.(laakiin ysan ku jirin ka hor (10/27/2010).Liiskaas kuma jiraan qoraalada daaweynta kharash Nala soo xiriir si aad u hesho akhbaarta khidmada ku saabsan adigoo isticmaalaya akbaarta ku qoran gadaalka ogosiiskan si aad u heshid akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan khidmadaha.bixinta hawgalada ee daryeelada caafimaad aad adigu ogolaatay iyo waxyaabo kale oo khaas ahJ Hadii aad akhbaartaan codsato in ka badan hal mar 12 ki biloodba waxaa laga yaabaa in aan kaa qaadno khidmad yar oo ladifan oo ku salaysan ka jawaabida codsiyadaas dheeraadka ah . Nala soo xiriir si aad u hesho akhbaarta khidmada ku saabsan adigoo isticmaalaya akbaarta ku qoran gadaalka ogosiiskan si aad u heshid akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan khidmadaha..

**Xadidida:** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in xadidaad dheeraad ah la saaro isticmaalkayaga ama bixintayda aan bixinayni akhbaartaada caafimaad. Aniga na loogama baahna in aan adeecno xadidaadyadaas dheeraadka ah, laakiin hadii aan saa sameyno,waxaan si hubaal ah u adeecaynaa heshiisyadayada (marka laga reebo xaaladaha degdega ah). Wixii heshiis ah ee aan wada gaarno ee la xiriira xadidida Waxaad xaq u leedahay in aad codsato dheeraad ahi waa khasab in uu qoraal yahay oo ayna saxiixaan dad awood u leh saxiixidaas Waxaad xaq u leedahay in aad codsato

**Wada Xiriirida kale:** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in aan kula socodsiino akhbaartaada caafimaad. Waa khasab in aad codsigaaga isadoo qoran soo gudbiso111 Waa in aad ku cadaysaa codsigaagawaxa aad rabtid iyo sida aad u bixinaysid kharashka

**Bedelid:** Waxaad xaq u leedahay in aad codsato in wax laga bedelo akhbaartaada caafimaad. Waa khasab in aad codsigaaga isadoo qoran soo gudbiso,aadna sharaxdid sababta aan wax ugu bedelayno akhbaarta.daruufaha khaas ah awgood waxaa laga yaaba in aan codsigaada diidno.

**SU'AALAHA IYO EED SHEEGADYADA**

Hadii aad doonayso akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan hab dhaqanayada xog xafidida ama aad qabtid su'aalo ama walaac ku saabsan arintaas fadlan nala soo xiriir adigo isticmaalaya akhbaarta ku qoran gadaalka ogoysiiskan.

:Hadii aad qabtid in:

- aan ku xad gudubnay xaquuqdaada xog xafidida,
- Gaarnay go'aan khalad ah oo ku saabsan helitaankaaga akhbaartada caafimaad,,
- Jawaabtayada codsiga aad soo gudbisay ee ah in wax laga bedelo ama la xadido isticmaalka ama bixinta akhbaartaada caafimaad khalad bay ahayd ama,
- Aan kula socodsiino qaab kale ama si kale oo oo wax loo sameeyo ama meel kale.

Waad nala soo xiriir kartaa adigoo isticmaalaya akhbaarta hoos ku qoran.. Waa in aad u soo gudbisaa eed sheegad qoran Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada ee U.S. Waxaan ku siin doonaa ciwaanka aad u dirsaysid eed shaagadkaaga ee Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada ee U.S marka aad codsato. Waxaan gargaaraynaa xaquuqdaada aad leedahay ee ah in xogtaada caafimaad la xafido. si kastaba ha noqotee lagaa aarsan maayo hadii aad dooratid in aad naga xareysid eed sheegad ama aad ka xaraysid eeg sheegatdka Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada ee U.S ka.

**KALA XIRIIR XAFIISKA ILKAHA:**

Ready.Set. Smile
Telefoonka: (612) 308-6679
Emailka: janderson@readysetsmile.org